

# Habka loo kala hor marinayo dadka tijaabada laga qaadayo oo la nidaamiyay iyo xeerarka karantiilka oo la adkaynayo

Baahida badan ee loo qabo tijaabooyinka degdegga ah iyo kuwa qofku iska qaadayo awgood waa in ay degmooyinku hadda sidii hore si ka wacan u nidaamiyaan habkay ukala hor marinayaan dadka tijaabada laga qaadayo. Isla markaana waxay dawladdu Agaasinka Caafimaadka fartay in degdeg loo soo iibiyo tijaabooyin badan. Laga billaabo saqda dhexe habeenka 15-ka diseembar xeerarka karantiilku isku mid ayay noqonayaan nooc walba oo fayrasku yahay.

– Waxay aad ugu badan tahay in is-qaadsiinta nooca omikoroon ay in badan kordhi doonto toddobaadyada soo socda. Tijaaba-qaadista ayaa ah tillaabo muhiim ah oo lagu xaddido faafidda cudurka, baahi weyn ayaana loo qabaa tijaabooyinka degdeg ah iyo kuwa qofku iska qaadayo. Wuxaan dhowaan soo iibsannay 10 milyan oo ah tijaabooyinka degdegga iyo kuwa qofku iska qaadayo, kuwaas oo la keeni doono sanadka cusub ka hor. Waan sii kordhinaynaa oo waxaan Agaasinka Caafimaadka faraynaa in uu isla haddaba billaabo sidii qaar kale lagu keeni lahaa. Waa muhiim in aanay waxyeello soo gaarin hawlaha bulshada muhiimka u ah. Wuxaan sidaas darteed loo baahan yahay in aan sidii hore in ka badan dadka mudnaan u kala siinno marka la isticmaalayo tijaabooyinka degdegga ah iyo kuwa qofku iska qaadayo, ayay tiri wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Sida ay degmooyinku dadka u kala hor marinayaan isticmaalka tijaabooyinka degdegga ah iyo kuwa qofku iska qaadayo:

- Dadka u dhow dadka haya hawlo bulshada muhiim u ah marka uu omikoroon dillaaco

- Marka qofku calaamado leeyahay:
  - In mudnaanta la siiyo shaqaalaha caafimaadka iyo adeegga daryeelka marka ay leeyihiiin calaamado aan aad u muuqan, dadka kale ee haya hawlo bulshada muhiim u ah iyo carruurta.
- Marka la og yahay in ay xubnaha dadka guriga deggan iyo dadka xiriir sidaas oo kale u dhow la leh in ay u dhowaadeen qof cudurka qaba:
  - Mudnaanta sii carruurta
  - Mudnaanta sii shaqaalaha adeegga caafimaadka iyo daryeelka
  - Mudnaanta sii dadka u dhowaaday qofka cudurka laga helay marka uu omikoroon dillaacay
- Marka la og yahay in dadka kale ee qofka u dhowaaday ay u dhowaadeen qof cudurka qaba:
  - Mudnaanta sii carruurta iyo shaqaalaha adeegga caafimaadka iyo daryeelka, iyo haddii loo baahdana dadka haya hawlaha bulshada muhiimka u ah ee ka mid ah dadka kale ee u dhowaaday qof laga helay cudurka – laakiin aan meesha omikoroon ka dillaacin.
- Carruurta oo si joogto ah tijaabo looga qaado, gaar ahaan meelaha cudurku muddo dheer ku badan yahay.
- Shaqaalaha adeegga caafimaadka iyo daryeelka oo si joogto ah tijaabo looga qaado sida waafaqsan talooyinka Agaasinka Caafimaadka – iyo meelaha cudurku muddo dheer ku badan yahay.

Agaasinka Caafimaadka ayaa warbixin intaan ka badan u diraya degmooyinka. Dawladduna gadaal ayay ka soo saari doontaa istaraatijayadda cusub ee mustaqbalka fog ee hawlaha tijaaba-qaadka, gooni-u-bixidda, raadraaca cudurka iyo karantiilka (TISK).

– Tijaaba-qaadku wuxuu gacan ka geystaa in bulshadu furnaato, waxaana sidaas darteed la doonayaa in la badiyo tijaabada-qaadista carruurta, shaqaalaha hay'adaha waxbarashada, shaqaalaha adeegga caafimaadka, dadka ku dhex jira bey'adaha cudurku ku badan yahay iyo shaqaalaha hawlaha dhaqanka iyo shirkadaha gaarka ah. Waxay dawladdu qiimayn ku samayn doontaa sida is-

beddel loogu sii samayn karo hawlaha TISK, si ay degmooyinka ugu fududaadaan hawlaha raadraaca cudurka oo karantiilku u yaraado. Sanadka cusub kaddib ayaan u soo laaban doonaa istaraatijiyyadda cusub ee TISK ee mustaqbalka fog, ayay tiri Kjerkol.

## Xeerarka karantiilka

Markii nooca omikoroon Norway lagu arkay waxaa la soo rogay xeerar adag oo ku saabsan gooni-u-bixidda iyo karantiilka dadka u dhowaada qof la xaqiijiyay ama looga shakiyay nooca omikoroon, si loo joojiyo faafidda cudurka.

– Waa wax aad u adag in xeerar is-barbaryaalla loo raaco raadraaca cudurka, marka uu nooca omikoroonku sii badanayana waxayba taasi noqonaysaa mid aan habboonayn. Sidaas awgeed ayaan isku mid ka dhigaynaa xeerarka gooni-u-bixidda iyo karantiilka nooc walba oo fayrasku yahayba – annaga oo raacayna taladii laamaha caafimaadka. Arrintan aya karantiil ku waajibinaysa xubnaha dadka guriga deggan iyo kuwa xiriir sidaas oo kale u dhow la leh, ayaga oo 7 maalin kaddib karantiilka uga bixi kara in ay tijaabo iska qaadaan. Dadka kale ee u dhowaaday qof cudurka laga helay waxay karantiilka uga bixi karaan ayaga oo 3 maalin kaddib iska qaada tijaabo cudurka laga waayay, laakiin weli waa in ay ku jiraan karantiilka wakhtiga firaaqada la yahay ilaa inta ay 7 maalin kaddib tijaabo iska qaadayaan oo cudurka laga waayayo. Shaqaalaha haya hawlaha bulshada muhiimka u ah waxaa shardigan laga dhaafayaa xilliga shaqada, ayada oo laga doonayo in ay iska qaadaan tijaabo cudurka looga waayo isla maalinta ay shaqada qabanayaan, ayay tiri Kjerkol.